DEPARTMENT OF HEALTH

# Lammaanahaagu wuxuu qabaa cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida (“Trich”): Waxa ay tahay inaad ogaato

TILMAAMAHA & MACLUUMAADKA LOOGU TALAGALAY DADKA LAMMAANAHOODA LAGA HELAY CUDURKA KU DHACA XUBNAHA TARANKA IYO MARINKA KAADIDA

## Waa maxay cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida (trichomoniasis)?

Cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida (Trichomoniasis) (sidoo kale loo yaqaano “Trich”) waa mid ka mid ah cudurrada lagu kala qaado galmada (STIs) ee ugu badan ee ka dhaca gudaha Mareykanka. Cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida waxaa keena dulin si fudud ugu faafo **nooc kasta** oo galmo ah, oo ay ku jiraan galmada afka, siilka, iyo/ama dabada ee lala sameeyo qof horay u qabay cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida. Sababtan awgeed, way habboon tahay inaad u maleyso inaad sidoo kale qabto cudurkan waxaana lagu siin karaa daawayn adigoon marka hore aadin dhakhtarka.

## Waa maxay astaamaha cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida (trichomoniasis)?

Nasiibdarro, aad **ayay u badan tahay in dadku aysan yeelan wax astaamo ah** (sidoo kale loo yaqaano “muujinta astaamah”) cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida ah. Maadaama ay suurtogal tahay in qofku uu ku dhaco cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida oo uusan ka warqabin una gudbiyo dadka kale, waxaa muhiim ah in la iska baaro cudurrada laga kala qaado galmada (STIs), oo ay ku jiraan cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida ugu yaraan sannadkiiba mar haddii aad samayso galmo iyo marka aad yeelato lammaane(yaal) cusub.

## Maxaa dhici kara haddii cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida aan la daaweyn?

Cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida **wuxuu horseedi karaa dhibaatooyin caafimaad oo halis ah haddii aan la daaweyn**, xitaa haddii qofka qabo cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida uusan lahayn astaamo. Qaar ka mid ah arrimaha caafimaadka ee suurtogalka ah ee dhici kara haddii cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida aan la daaweyn waa:

- Cudur aad u daran oo ku dhaca dadka qaba xubnaha jirka haweenayda (sida ilmo-galeenka, ugxan-sidaha, iyo/ama tuubooyinka ugxan-sidaha) ee loo yaqaano Cudurka Bararka Misigta (PID) kaasoo u horseedi kara inay awoodi wayso inay uur qaado (“madhalaysnimo”),

dhibaatooyinka uurka ee mustaqbalka sida uurka ka dhaca meel ka baxsan ilmo-galeenka (“uurka ka dhaca meel aan caadi ahayn”), iyo/ama arrimaha xannuunka muddada raaga.

- Dadka uurka leh ee qaba cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida waxaa laga yaabaa in ay dhalaan ilmaha kahor xilligii ay ahayd inay dhallaan (“dhicis”) waxaana laga yaabaa in ilmuhu qabaan arrimo caafimaad oo ay ku jiraan miisaan yari, naafonimo, iyo/ama cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida oo gaar u ah.
- Caabuqa aan la daaweyn wuxuu kordhiyaa halista aad ugu jirto inaad qaado ama aad ku gubiso HIV, fayraska keena AYDHISKA.

## Sideen u qaataa daawadayda si aan isaga daaweeyo cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida?

Dadka intooda badan waxaa la siin doonaa antibiyootiga loo yaqaano metronidazole. Waxaa laga yaabaa in daawayntaadu ay ka duwan tahay daaweynta qof kale. Dadka leh xubnaha jirka ee dheddiga waa inay qaataan metronidazole laba jeer maalintii muddo 7 maalmood ah sababtoo ah waxaa laga yaabaa inuu ka waxtar badan yahay halka garoojo. Dadka qaba xubnaha jirka ee labka waxaa lagu daaweyn karaa hal garoojo ama labo jeer maalintii muddo 7 maalmood ah. Qaado daawadaada metronidazole cuntada kadib haddii aad awooddo. Dadka aan qaadan karin daawada metronidazole waxay heli karaan daawada tinidazole oo beddel u ah. **Ha la wadaagin antibiyootiga qof kale. Waa inaad qaadato dhammaan daawada lagu siiyay si ay u noqoto mid wax-ku-ool ah oo ay uga takhalusto cudurka oo dhan.**

## Maxaa dhici kara haddii aan waxdhimaalo ka qaado daawada?

Antibiyootigyada (metronidazole ama tinidazole) ee loo isticmaalo daawaynta cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida aad ayay ammaan u yihiin. Calool-xannuun, shuban, madax-xanuun, dhadhan macdan camal ah, iyo lallabbo waa waxdhimaalada caadiga ah ee antibiyootigyadaan oo dhan, waana caadi in dadka qaata ay yeeshaan astaamahaan. Ma ahan kuwo halis ah, iskood ayayna u bixi doonaan marka aad dhammaysato antibiyootiga. Waxdhimaaladaan ma ahan xasaasiyad antibiyootig.

Falcelin xasaasiyadeed in la arko aad ayay dhif u tahay. Haddi aad ogtahay inaad xasaasiyad ka qaaday antibiyootiga goor hore, u sheeg dhakhtarkaaga ama farmashiistahaaga kahor inta aadan qaadan daawada. Xitaa haddii aad xasaasiyad ka qaaday hal antibiyootig goor hore, waxaad weli awoodi kartaa inaad qaadato antibiyootiga laguu qoray waqtigan. **Haddii waqti kasta oo la joogo ay kugu adkaato neefsashada, barar ku aragto wejigaaga ama qoortaada, furuuruc (firiiric kuuskuusan, cuncun leh), ama shuban biyood aad u daran oo aadan ka bixi karin guriga, u tag waaxda gargaarka degdega ah ee kuugu dhow.**

## Maxaan sameeyaa marka xigta?

- **Ha samayn nooc kasta oo galmo ah muddo 7 maalmood ah KADIB MARKAAD DHAMMAYSATO daawada– waxay qaadataa daawadu muudo-dheer si ay si buuxda**

**ugu daaweyso cudurka, si aadan ugu gudbin dadka kale ama dadka la tacaalaya arrimo caafimaad oo aad u daran.**

- U sheeg dhammaan dadka aad galmo la samaysay 2-dii bilood ee u dambeeyay (ama lammaanahaagii ugu dambeeyay) in lagaa daawaynayo cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida si iyagana loo baaro loona daawayn karo, sidoo kale.
- Dadka qaba cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida waxay aad ugu dhowdahay inay mar kale qaadaan – waa fikrad wanaagsan in laga baaro cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida iyo cudurrada lagu kala qaado galmada (STIs) ee kale qiyaastii 3 bilood gudahooda.
- Iskastoo dad badan oo qaba cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida laga yaabo inaysan ka warqabin inay qaadeen cudurka maadaama aysan lahayn astaamo, waxaa muhiim ah inaad isaga baarto cudurrada lagu kala qaado galmada (STIs) si joogto ah (qiyaastii 6-12 biloodba mar) iyo markaad yeelato lammaane(yaal) cusub oo aad la galmooto.
- Isticmaalka kondhomka iyo galmo la samayanta lammaane(yaasha) ku dhaqma galmada ammaanka badan oo sida joogtada ah isku baaro ayaa yaraynaysaa fursadaha ah inuu mar kale kugu dhaco cudurka ku dhaca xubnaha taranka iyo marinka kaadida.
- **HADDI AAD QABTO SU'AALO: la xiriir xirfadle caafimaad (sida dhakhtar ama farmashiiste), ka wac Khadka Tooska ah ee Minnesota Family Planning and STD 1-800-783-2287, iyo/ama booqo rugta caafimaadka galmada sida rugta Clinical Door Clinic (612-543-5555) ama Rugta Caafimaadka 555 (651-266-1255).**
- **Haddii aad leedahay lamaanayaal badan oo aad dareemayso inay ka faa'iidaysan karaan daawaynta, u sheeg inay soo wacaan Khadka Tooska ah ee Minnesota Family Planning and STD 1-800-783-2287, iyo/ama booqo rugta caafimaadka galmada sida rugta Red Door Clinic (612-543-5555) ama Rugta Caafimaadka 555 (651-266-1255).**

Minnesota Department of Health (Waaxda Caafimaadka ee Minnesota)
P.O. Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
www.health.state.mn.us

05/9/22

Si aad xogtaan ugu hesho qaabab kale, wac: 651-201-5414